JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 13aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 11/08/2024* |



# XEERKA CIIDANKA QARANKA SOMALILAND
# XEER LR.105/2023


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Sannadka 2024*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-1336/072024** **Taar: 31/07/2024**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Ciidanka Qaranka, Xeer Lr. 105/2023**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-8/21/2024, summadiisuna tahay GW/G/10/203/2024, kuna taariikhaysan 10/07/2024, ujeeddadiisuna tahay Soo-gudbinta Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka, Xeer Lr. 105/2023;

**Waxaan soo saaray;**

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 105/2023.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| | JSL/XM/GW/081-1233/032024 kuna taariikhaysnayd **16/03/2-24** |
| Markuu U codeeyay:- | Soo jeedinta Wax ka badelka iyo Kaabista Madaxweynaha ee **xeerka Ciidanka Qaranka Xeer** Lr. **105/2023** taariikhdu markay ahay **30/06/2024** kalfadhigii **8aad** fadhigiisi **12aad**. |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah (**35 cod**) oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Ciidanka Qaranka **Lr. 105/2023**, halka ay ka diideen 2 Mudane, kana aamuseen 7 Mudane, Gudoomiyuhuna aanu ka codayn.

<u>ALLAA MAHADLEH</u>

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

**Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka
Xeer Lr. 105/2023

## GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay:-** Qodobka 34aad Farqadiisa 1aad, Qodobka 37aad Farqadiisa 1aad, iyo Qodobada 38aad, 53aad, 76aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu ka duulay:-** Nuxurka Qodobka 123aad ee Dastuurka Qaranka JSL kaas oo si cad u qeexaya Mabaddi"ida Ciidanka Qaranka iyo doorkooda Ilaalinta iyo difaaca Madax-bannaanida dalka.

**Markuu Tixgaliyay:-** Baahida loo qabo in Ciidamada Qaranku helaan Xeer maamul oo lagu dhaqo Qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka sida ku cad Qodobka 123aad Farqaddiisa 3aad iyo baahida loo qabo dhisidda Ciidan Qaran oo casri ah oo la jaanqaadaya horumarka Somaliland.

**Markuu Qiimeeyay:-** In dhismaha iyo tababaradda Ciidamada Qaranku ay Muhiimad gaar ah u leeyahay Madax-bannaanida iyo dhismaha Qaranka jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Tixgaliyay** Soo jeedinta Madaxweynaha oo wax ka badel iyo kaabis dib ugu soo celiyay Xeerka Ciidanka Qaranka ee Tixrraaceedu ahaa

RECEIVED
11 JUL 2024
Reg No 1047

# GOLAHA WAKIILLADA JSL

**Markuu arkay:** Qodobka 34 aad Faqraddiisa 1aad, Qodobka 37aad Faqraddiisa 1aad iyo Qodobbada 38 aad, 53aad, 76aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu ka duulay:-** Nuxurka Qodobka 123 Aad ee Dastuurka Qaranka JSL, kaas oo si cad u qeexaya Mabadii'da Ciidanka Qaranka iyo doorkooda Ilaalinta iyo difaaca madaxbannaanida dalka.

**Markuu Tixgaliyay:-** Baahida loo qabo in ciidanka qaranku helaan xeer maamul oo lagu dhaqo qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka, sida ku cad Qodobka 123aad Faqraddiisa 3aad iyo in la' helo dhisidda Ciidan Qaran oo casri ah oo la'jaanqaadaya horumarka Somaliland.

**Markuu Qiimeeyay:-** In dhismaha iyo tababarrada Ciidanka Qaranku ay muhiimad gaar ah u leedahay madaxbannaanida iyo dhismaha Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Tixgeliyay:-** Mooshinka curinta Xeerka Ciidanka Qaranka oo ay soo jeediyeen tiro mudaneyaal ah oo ka tirsan Golaha Wakiillada.

**WUXUU ANSIXIYAY**

**Xeerka Ciidanka Qaranka JSL**

**Xeer Lr. 105/2023**

## QAYBTA KOOWAAD

## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Ciidanka Qaranka Somaliland, Xeer Lr. 105/2023.

### Qodobka 2aad

### Erey-bixinta Xeerka

Haddii aan nuxurku si'ka duwan u tilmaamin ereydan soo socda, waxa looga jeedaa:

**Madaxweyne:** Waxa loola jeedaa madaxweynaha ahna Taliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka JSL.

**Wasiirka Gaashandhigga:** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaarada Gaashandhigga oo ah masuul madani ah si'waafaqsan Dastuurka JSL.

**Baarlamaanka:** Waxa loola jeedaa goleyaasha sharci-dejinta Somaliland; Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida.

**Ciidanka Qaranka:** Waxa loola jeedaa Ciidanka Milatariga Somaliland ee ku aasaasan qodobka 123aad ee Dastuurka.

**Taliska Guud:** Waxa loola jeedaa Taliska Guud ee Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Taliyaha Ciidanka Qaranka:** Waxa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Qaranka ee ugu sarreeya maamulka iyo hoggaaminta Ciidanka Qaranka.

**Abbaanduulaha Ciidanka:** Waxa loola jeedaa mid ka mid ah ku-xigeennada Taliyaha Ciidanka Qaranka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Askari:** Waxa loola jeedaa xubin ka mid ah Ciidanka Qaranka oo aan ahayn sarkaal ama sarkaal xigeen.

**Derajo:** Waxa loola jeedaa derajada ciidanka ee la'siiyo xubnaha Ciidanka Qaranka.

**Dastuur:** Waxa loola jeedaa Dastuurka Somaliland.

**Degdeg:** Waxa loola jeedaa xaalad degdeg ah ama xaalad aad u adag oo soo wajahday qayb ama dhammaan bulshada Somaliland, middaas oo ay tahay in tallaabooyin wax ku ool ah ay ka qaaddo dawladdu, taas oo ay amreen madaxweynaha ama Baarlamaanka JSL.

**Dhisme Ciidan:** Waxa loola jeedaa dhisme ciidan oo ka kooban saddex cutub ama in ka badan.

**Fakad:** Waxa loola jeedaa xubin ka tirsan ciidanka kaas oo si' ula kac ah uga tagay shaqada ciidanka ama goobta shaqo, isaga oo aan ka haysan fasax taliskiisa.

**Fasax-sannadeed:** Waxa loola jeedaa fasax sannadeedka caadiga ah ee laga qaato waajibaadka shaqo.

**Fasax Shaqo:** Waxa loola jeedaa fasax shaqo, iyada oo ay jirto shaqo.

**Fasax Xanuun:** Waxa loola jeedaa marka shaqada lagaga jiro fasax, iyada oo ay jiraan xanuun ama dhaawac.

**Gaas:** Waxa loola jeeddaa guutooyin ka kooban ugu yaraan saddex guuto oo leh talis gaas oo hoos yimaadda qayb ka tirsan qaybaha Ciidanka Qaranka.

**Gunno Hawlgab:** Waxa loola jeedaa gunno bille ah oo lagu jaangooyey derajo iyo waqtiga shaqada ciidanka, ka dib marka uu hawlgabo xubin ka mid ah Ciidanka Qaranka oo la'siiyo dadka aan la'siin xaqsiinta.

**Hawlgab:** Waxa loola jeedaa xubin hore oo ka tirsanayd Ciidanka Qaranka oo hadda shaqada ka hawlgabay ama kaga tegay shaqada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Hoggaan:** Waxa loola jeedaa hoggaan, Waax (department) ka tirsan hoggaannada taliska guud ee Ciidanka Qaranka.

**Jihayn Ciidan:** Waxa loola jeedaa awaamiirta la'siiyo ciidanka, si'loo ilaaliyo, in la'adeegsado waxyaabaha reebban ama adeegsiga awoodda, hubka iyo tabta iyada oo la eegayo duruufaha markaas taagan.

**Ka diyaargarow xaalad la'filayo:** Waxa loola jeedaa diyaarinta qorshe iyo ciidan oo ku wajahan xaalad gaar ah oo la'filayo in ay dhacdo.

**Keyd Ciidan:** Waxa loola jeedaa muwaaddin kasta oo loo diyaariyay in uu ka mid noqdo ciidanka keydka ah una diiwaan gashan.

**Magacaabis:** Waxa loola jeedaa marka si toos ah qof loogu magacaabo xil ama shaqo gaar ah.

**Maxkamadda Ciidamada:** Waxa loola jeedaa Maxkamadda Ciidamada Qaranka ee ku aasaasan qodobka 104aad ee Dastuurka JSL

**Miinada dhulka:** Waxa loola jeedaa walax kasta oo samaysa qarax waxyeelo u gaysan kara dadka iyo gaadiidka, walaxdaas oo dhulka laggu aaso ama dhulka guudkiisa la dhigo si loogu gaysto waxyeelo

**Qayb:** Waxa loola jeedaa fadhiisin ka tirsan fadhiisimaha Ciidanka Qaranka oo ka kooban ugu yaraan saddex gaas, lehna talis qaybeed.

**Qiimeynta:** Waxa loola jeedaa habka ay saraakiisha sare u qiimeeyaan, hawl gudashada saraakiisha hoose, marka ay ku gudo jiraan waajibaadkooda ciidan ama marka ay dhammaystaan tababarrada.

**Qoris khasab ah:** Waxa loola jeedaa qorista Ciidanka Qaranka oo khasab ah, middan oo salka ku haysa xeer ay ansixiyeen Golaha Wakiilladu.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Rasaas aan la'qarxin:** Waxaa loola jeedaa rasaas aan la'isticmaalin ama aan la'qarxin.

**Saad/Keyd urursi:** Waxa loola jeedaa iibsiga hantida, alaabada iyo adeegyada uu u baahan yahay Ciidanka Qaranku.

**Saadka:** Waxa loola jeedaa khidmadda/gunnada raashinka iyo saliidda cuntada lagu kariyo ee la'siiyo xubna ciidamada.

**Saldhig:** Waxa loola jeedaa deegaan ciidan oo joogto ah oo uu Ciidanka Qaranku leeyahay.

**Sarkaal Xigeen:** Waxa loola jeedaa xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Qaranka oo derajadiisu tahay laba-alifle illaa saddexxadhigle.

**Sarkaal:** Waxa loola jeedaa sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Qaranka oo derajadiisu tahay xiddigile iyo wixii ka sarreeya.

**Shaqo-qaran:** Waxa loola jeedaa arday kasta oo ka qayb gala barnaamijka adeegga qaranka ee shaqo-qaran.

**Shisheeye:** Waxa loola jeedaa lahaansho qaran kale oo aan ahayn Somaliland.

**Tabaha:** Waxa loola jeedaa xeeladaha ay Ciidamada Qaranku

isticmalaan, marka ay ku gudo jiraan hawlgallada.

**Tababar bilaw ah:** Waxa loola jeedaa muddada uu socdo tababarka billawga ah ee askarta iyo saraakiisha la'qarameeyay.

**Waajib Gudasho:** Waxa loola jeedaa xubnaha ciidanka ku guda jira hawlaha iyo Waajibaadka ciidanka, marka laga reebo xubnaha fasaxa caadiga ah haysta.

**Walxaha Qarxa ee ka hadha dagaalka:** Waxa loola jeedaa tuurista/xooridda qalab ciidan, kaas oo ay suurtagal tahay in uu sababo dhimasho ama dhaawac



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

ama burbur hantiyeed, marka uu qarxo. Tusaale ahaan rasaasta iyo hubka.

**Wasaarad:** Waxa loola jeedaa Wasaaradda Gaashandhigga.

**Xaqsiin:** Waxa loola jeedaa xaqsiin hal mar ah oo lagu jaangooyey derajo iyo waqtiga shaqada ciidanka, maadaama uu xaqsiin yahay xubinta ka mid ah Ciidanka Qaranka, midkaas oo aan lahayn xuquuqda hawlgabka.

**Xeer-ilaalinta:** Waxa loola jeedaa xeer-ilaalinta ciidamada.

**Xeer:** Xeer waxa loola jeedaa Xeerka Ciidanka Qaranka.

**Xubnaha ciidanka:** Waxa loola jeedaa xubint Ciidanka Qaranka ee ku aasaasan qodobka 123aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 3aad

## Ujeeddooyinka xeerka

Ujeeddooyinka xeerku waa:

1. In la'helo xeer maamul oo qeexaya qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka, waajibaadka shaqo iyo awoodaha Ciidanka Qaranka.

2. In la'sugo xuquuqda iyo daryeelka xubnaha Ciidanka Qaranka iyo in lagu caddeeyo habka shaqo qorista, tababarrada iyo aqoon-korodhsigooda.

3. In laga dhigo Ciidanka Qaranka hay'ad ku aasaasan xeer qeexan, sida uu waajibiyay qodobka 123aad ee Dastuurka Somaliland.

4. In laga dhigo Ciidanka Qaranka hay'ad xirfad sare leh oo ka madaxbannaan siyaasadda, islamarkaana ah dhexdhexaad aan sinnaba ugu milmin siyaasadda



XAFIISKA XAGAAJAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • GENERAL OFFICE

### Qodobka 4aad

### Xadka Dabbaaqaadda Xeerka

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa Ciidanka Qaranka ee ku aasaasan qodobka 123 aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

## QAYBTA LABAAD

## CIIDANKA QARANKA

## XUBINTA KOOWAAD

## AASAASKA CIIDANKA QARANKA

### Qodobka 5aad

### Aasaaska Ciidanka Qaranka

1. Iyada oo laga duulayo qodobka 123aad ee Dastuurka Somaliland, waxa xeerkani aasaasay Ciidanka Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland (National Army of the Republic of Somaliland).
2. Ciidanka Qaranku waa ha'yad dastuuri ah oo leh jiritaan xeereed oo gaar ah.
3. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland ayaa go'aaminaya tirada iyo xoogga uu yeelanayo Ciidanka Qaranku, marka uu la'tashado Guddida Difaaca (Defense Committee) ee ku aasaasan xeerkan.

### Qodobka 6aad

1. Ciidaanka Qaranku waxa uu ka kooban yahay: Qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka:

    b. Ciidanka Dhulka.

    t. Ciidanka Cirka (Air Force).

    j. Ciidaanka Badda (Navy).

2. Qaab-dhismeedka maamul ee Ciidanka Qaranku waa:

    i. Taliyaha Ciidanka;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

ii. Abbaanduulayaasha;

iii. Hoggaanno;

iv. Qaybo;

v. Gaasas iyo guutooyin;

vi. Iyo kulliyadaha aqooneed iyo dugsiyo tababar.

3. Xubnaha Ciidanka Qaranku waxa uu ka kooban yahay:

B. Ciidanka joogtada ah (regular force);

T. Ciidanka keydka ah oo ka sii kooban:

J. Keydka joogtada ah (regular reserve);

X. Keydka is-xilqaamay (volunteer reserve), haddii Gudida Difaacu ay u aragto daruuri in la'sameeyo keydka is-xilqaanka ah.

Kh. Ciidanka tababarka ku jira (cadet force).

## Qodobka 7aad

## Mabaadii'da Saldhigga u ah Ciidanka Qaranka

Si'waafaqsan qodobka 123aad ee dastuurka oo lagu aasaasay Ciidanka Qaranka, mabaadii'da hagaysa Ciidanka Qaranku waa:

1. Ilaalinta iyo raacitaanka Dastuurka iyo xeerarka dalka u yaal oo ay ka mid yihiin xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee qofka.

2. U dhaqmidda halbeegga xirfadnimo ee ugu sarreeya iyo edebta ugu sarraysa ee looga baahan yahay Ciidanka Qaranka.

3. Kala amarqaadashada iyo kala dambaynta madaxda sare ee ciidanka (chain of command).

4. Ka madaxbannaanida loolanka siyaasadeed ee dalka gudihiisa iyo xisbiyada/ururada siyaasadda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

5. Ka fogaanta kala qaybsanaanta iyo noocyada takoorka.

## Qodobka 8aad

## Astaanta Ciidanka Qaranka

Ciidanka Qaranka JSL waxa ay leeyihiin astaan iyo calan u gaar ah oo faahfaahintiisu tahay:

1. Astaanta Ciidanka Difaaca Qaranka waxa ka muuqda laba waran oo ka dambeeya laba xaraf oo isdhaafsan oo ah "SL", oo ku dhex jira goobo cas oo ku dhammaystiran midab cagaar ah oo ay ku dahaadhan tahay caleen dheeman ah.

2. Isticmaalka astaantaasi waxa ay u gaar tahay Ciidanka Qaranka, lahaanshaheedana waxa iska leh dawladda Somaliland.

3. Astaanta Ciidanka Qaranku waa in ay ka muuqato dirayska, shaambadaha, kaadhadhka aqoonsiga, dhiganeyaasha keydsan iyo waxyaabaha kale ee gaarka ah ee Ciidanka Qaranka JSL.

## Qodobka 9aad

## Goobaha Hawlgallada

1. Ciidanku waa in ay ka hawlgalaan saldhigyada iyo xeryaha loo qoondeeyay ee Somaliland gudaheeda ama xeryaha kale oo ay ku jiraan waddamada kale ee xubnaha ciidanka ay dejisay Wasaaradda Gaashaandhigu.

2. Safaaradaha Somaliland ee dalalka shisheeye waxa loo diri doonaa u qaybsanaha arrimaha ciidamada (Military attaché) waxaana magacaabi doona Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Debadda, marka uu helo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.

## Qodobka 10aad

## Awoodda hawlgal ee Ciidanka Qaranka

1. Ciidanka Qaranku waxa awooddiisa hawlgal ay gaadhsiisan tahay dhamaan soohidamaha dalka ee berriga, jasiiradaha, biyaha gobolleed, dhulka iyo badaha hoostooda iyo hawada sare.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Haddii loo baahdo in Ciidanka Qaranka loo diro dal kale, sababo hawlgal nabad ilaalin ama sababo kale oo waafaqsan xeerarka dawliga ah, Madaxweynuhu waa in uu u soo gudbiyo labada aqal ee Baarlamaanka codsi faahfaahsan oo uu ku dalbanayo in Baarlamaanku ogolaado in Ciidanka Qaranka loo diro dalka debeddiisa.

3. Waxa Ciidanka Qaranka loo diri karaa dal kale, haddii cod aqlabiyad fudud ah uu ku ansixyo Baarlamaanka oo yeeshay fadhi wada jir ah, si'waafaqsan Dastuurka Somaliland.

## Qodobka 11aad

## Xilka iyo Waajibaadka Ciidanka Qaranka

Iyada oo laga duulayo qodobka 123aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, xilka iyo waajibaadka Ciidanka Qaranku waa:

1. Ilaalinta iyo difaacidda madaxbannaanida Jamhuuriyadda Somaliland.Ilaalinta iyo ka difaacidda khataraha shisheeye qaranimada, madaxbannaanida, xuduudaha iyo israacsanaanta dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Somaliland.

2. Ilaalinta soohdimaha Jamhuuriyadda Somaliland oo ka kooban berriga, jasiiradaha, biyaha gobolleed, dhulka, badaha hoostooda iyo hawada sare.

3. Ka gacansiinta hay'adaha ammaanka xilliyada xaaladda degdegga ah ee Dastuurku jideeyey.

4. Ilaalinta xeerarka dawliga ah ee bani'aadantinnimo (international humanitarian law/law of war).

## Qodobka 12aad

## Xilka Ciidanka Qaranka ee Xaaladda Degdegga ah

Marka ay jirto xaaladda degdegga ah ee ku xusan qodobka 123aad ee Dastuurka, Ciidanka Qaranku waxa uu gacan ka gaysanaya xaaladaha degdegga ah ee ku xusan qodobka 92aad ee Dastuurka JSL.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 13aad

## Xilka iyo Waajibaadka Ciidanka ee Masiibooyinka Dabiiciga ah ama Dad sameega ah

Haddii ay timaaddo masiibo dabiici ahi sida: dhul-gariir, daadad iyo wixii la'mid ah ama masiibo dad samee ah sida: dab baahsan oo loo baahdo taageerada Ciidanka Qaranka, waxa uu madaxweynuhu amrayaa in Ciidanka Qaranku ku garab siiyo hay'adaha madaniga ah ee shaqada gargaarka degdegga ah haya.

## Qodobka 14aad

## Awoodda Madaxweynaha ee Ciidanka Qaranka

1. Sida ku cad qodobka 90aad ee Dastuurka, Madaxweynaha ayaa ah Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka (Commander-in-Chief).

2. Madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranku, waxa uu awood u leeyahay magacaabista iyo xil ka qaadista:

   b. Taliyaha Ciidanka (Chief of the Army) iyo

   t. Taliyeyaasha iyo abbaanduuleyaasha qaybaha ciidanka.

3. Madaxweynuhu waxa uu masuul ka yahay guud ahaan maamulka iyo xukunka Ciidanka Qaranka JSL.

4. Madaxweynahu waxa uu leeyahay awoodahan soo socda, isaga oo la'tashanaya Guddida Difaaca:

   b. Hoggaamінta guud ee Ciidanka Qaranka iyo hagistasiyaasadda iyo istiraajiyadda difaac ee dalka.

   t. Hoggaaminta, dallacsiinta, shaqo ka fadhiisiinta saraakiisha.

   j. Soo saaridda xeerar degdeg ah, si'waafaqsan Dastuurka.

   x. Waxa uu awood u leeyahay in uu cafis siiyo, xubnaha Ciidanka Qaranka ee ay dembi ku hesho



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
SOLICITOR GENERAL OFFICE
OFFICIAL GAZETTE

Maxkamadda Ciidanku, ama saamaxo xubnaha ciidanka Qaranka ee lagu ee lagu eedeeyo dambi si'waafaqsan qodobka 90aadfaqraddiisa 5aad ee Dastuurka Somaliland.

kh. Hoggaaminta xaaladaha dagaalka iyo ku dhawaaqidda xaaladda degdegga ah. (State of emergency).

d. Maamusidda iyo abaalmarinta xubnaha Ciidanka Qaranka.

### Qodobka 15aad

### Taliyaha CIidanka Qaranka

1. Ciidanka Qaranku waxa uu yeelanayaa Taliyaha Ciidanka Qaranka (Chief of the Army).

2. Taliyaha Ciidanka Qaranka waxa magacaabaya madaxweynaha, si'waafaqsan qodobbada xeerkan.

### Qodobka 16aad

### Shuruudaha magacaabista Taliyaha Ciidanka (Chief of the Army)

1. Qofka loo magacaabayo xilka Taliyaha Ciidanka waa:

    b. In uu yahay muwaadin dhalad ah oo reer Somaliland ah dhalasho ahaan (by birth).

    t. In uu ka tirsan yahay Ciidanka Qaranka JSL.

    j. In uu leeyahay derejo sare oo gaadhsiin karta xilka taliyenimo, iyada oo loo eegayo sida ay u kala sarreeyaan Ciidanku (seniority).

    x. In uu leeyahay aqoon ciidan iyo mid madani.

    kh. In uu haysto shahaado jaamacadeed ama wax u dhigma.

    d. In uu leeyahay khibrad xirfadda Ciidanka Qaranka oo aan ka yarayn 10 sannadood oo ay ku jirto khibrad sarkaalnimo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Marka madaxweynuhu magacaabo, qofka loo magacaabay xilka Taliyaha Ciidaanku, waa in uu maro dhaarta ku xusan xeerkan.

## Qodobka 17aad

## Xilka Taliyaha Ciidanka Qaranka. (Chief army)

1. Xilka Taliyaha Ciidanku waa:

    b. In uu kala taliyo madaxweynaha arrimaha ciidanka, hawlgallada iyo arrimaha maamul ee la'xidhiidha Ciidanka Qaranka.

    t. In uu si'sharciga waafaqsan u maamulo oo u habeeyo Ciidanka Qaranka, si' uu u ahaado ciidan edebtiisa iyo xirfaddiisu ay aad u sarrayso.

    j. In uu fuliyo amarrada sharci ee uu siiyo madaxweynuhu.

    x. In uu dejiyo siyaasadda iyo istiraajiyadda ciidan, isaga oo la'tashanayaa taliyeyaasha iyo abbaanduuleyaasha ciidanka.

    kh. In uu fuliyo kala danbaynta ciidanka, isaga oo soo saaraya amarro, tilmaamo iyo go'aanno sharci ah oo uu siiyo taliyeyaasha iyo abbaanduuleyaasha ciidanka.

    d. In uu hubiyo, in si'habboon loo isticmaalay kheyraadka iyo hantida ciidanka, waxbarashada iyo tababarka.

    r. In uu hawlgeliyo Ciidanka Qaranka.

    s. In uu hubiyo, in xubnaha Ciidanka Qaranku ay u guteen xilkooda iyo waajibka saaran si'waafaqsan Dastuurka iyo xeerka.

    sh. In uu hubiyo, in si'habboon loo fuliyo siyaasadaha, hab-raacyada iyo nidaamka u dejisan Ciidanka Qaranka.

    dh. Hoggaaminta Taliska Guud, dhammaan xarumaha ciidamada, colalka iyo dhammaan xubanaha Ciidanka Qaranka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

c. In Taliska Guud ay u gudanayaan hawlihii loo xilsaaray si'dardar leh oo hufan.

g. In ay jirto awood ciidan oo isku dubaridan, si'loo sameeyo waajibaad ciidan, iyada oo la'adeegsanayo ciidanka iyo kartidiisa ku habboon dagaalka, tababar iyo taakulaynta colalka.

### Qodobka 18aad

### Taliyeyaasha Qaybaha Ciidanka

1. Qayba Ciidanka Qaranka ee ku xusan xeerkan, waxa ay yeelanayaan taliyeyaal uu soo magacaabo madaxweynaha Somaliland, ka dib marka uu la'tashado Guddida Difaaca.

2. Taliyaha qayb ka mid ah Ciidanka Qaranku waa in uu maamulo oo xukumo qaybta loo xilsaaray, si'waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka, isaga oo raacaya tilmaamaha iyo amarrada Taliyaha Ciidanka.

3. Looma magacaabi karo taliye qayb ka mid ah Ciidanka Qaranka qof aan ka mid ahayn Ciidanka Qaranka.

### Qodobka 19aad

### Abaandulayaasha Ciidanka Qaranka

1. Abbaanduulaha koowaad iyo labaad ee Ciidanka Qaranka, waxa magacaabaya madaxweynaha.

2. Abbaanduulaha koowaad, waxa uu taliyaha ka kaalmaynayaa dhinaca hawlgallada.

3. Abbaanduulaha labaadna waxa uu taliyaha ka kaalmaynayaa maamulka.

4. Abbaanduuleyaashu xil ahaan waa labada sarkaal ee ku xiga Taliyaha Ciidanka Qaranka.



XAFIISKA QARETAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 20aad

## Guddida Difaaca Qaranka

1. Waxa xeerkan lagu aasasay Guddida Difaaca Qaranka oo ka kooban:

    b. Madaxweynaha;

    t. Wasiirka Gaashaandhigga;

    j. Wasiirka Arrimaha Gudaha (ama wasiirka u qaabilsan arrimaha amniga qaranka).

    x. Taliyaha Ciidanka Qaranka;

    kh. Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka;

    d. La-taliyaha Madaxweynaha ee Amniga Qaranka;

    r. Iyo masuul kasta oo kale ee madaxweynuhu go'aamiyo in uu ka mid noqdo Gudida Difaaca.

Guddidu waxa ay yeelanaysaa Xoghayaha Guddida Difaaca oo ah sarkaal ciidan oo uu xilkaas u magacaabo madaxweynuhu.

2. Guddida Difaacu, waxa ay u xilsaaran tahay jiheynta iyo ka go'aan gaadhista siyaasadda guud ee difaaca iyo xoojinta Ciidanka Qaranka.

3. Guddida Difaacu, waxa ay masuul ka tahay in ay Taliyaha Guud ee Ciidanka (Commander-in-Chief) ka gacan siiso maamulka, tilmaanta iyo hawlgudashada Ciidanka Qaranka.

4. Iyaga oo raacaya tilmaamaha Taliyaha Guud ee Ciidanka (Commander-in-Chief), Guddidu waxa ay ka shaqaynaysaa dhisidda, xoojinta iyo tayaynta Ciidanka Qaranka iyo xaqiijinta in Ciidanku higsado himilooyinkiisa.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## XUBINTA LABAAD

## QAYBAHA GAARKA AH EE CIIDANKA QARANKA

### Qodobka 21aad

### Booliiska Ciidanka Qaranka (military police)

1. Taliyaha Ciidanka Qaranku, waxa uu xubno ka tirsan Ciidanka Qaranka u magacaabi karaa in ay noqdaan Booliska Ciidanka Qaranka.

2. Xubnaha loo magacaabo Booliska Ciidanka Qaranka, waa in ay qaataan kaadhkaaqoonsiga ee tilmaamaya in ay yihiin Booliska Ciidanka Qaranka.

### Qodobka 22aad

### Xilka Booliska Ciidanka Qaranka (military police)

1. Xilka iyo waajibaadka shaqo ee Booliska Ciidanka Qaranka, waa in ay fuliyaan xeerarka ciidanka ee ciidanka dhexdiisa.

2. Booliska Millaterigu waxa uu si'gaar ah ugu xilsaaran yahay:

    i. Ka hortagga iyo la'dagaalanka dembiyada Ciidanka Qaranka.

    ii. Baadhitaanka dembi kasta oo lagu tuhmo in uu galay xubin ka mid ah Ciidanka Qaranka.

    iii. Ilaalinta amniga iyo kala danbeynta (law and order) ee Ciidanka Qaranka dhexdiisa.

3. Booliska Ciidanka Qaranka, waxa uu isticmaalayaa awoodaha booliis ee Xeerka Habka Ciqaabta ama xeer kale siiyay, isaga oo ku kooban Ciidanka Qaranka dhexdiisa.

4. Hab-raaca baadhitaanka, xadhigga, haynta, gelista goob, qabashada iyo wax kasta oo la'xidhiidha shaqada daruuriga u ah Ciidanka Booliska Qaranka, waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta ee dhaqan-galka ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

5. Booliska Ciidanka Qaranka, waxa ay la'shaqaynayaan Xeer-Ilaalinta Ciidanka Qaranka iyo Maxkamadaha Ciidanka Qaranka.

6. Awood uma laha Booliska Ciidanka Qaranku, in ay baadhaan ama qabtaan ama tallaabo kale oo sharci ka qaadaan, cid aan ahayn xubnaha Ciidanka Qaranka iyo goobaha Ciidanka Qaranka.

## Qodobka 23aad

## Sirdoonka Ciidanka Qaranka (Military Intelligence)

Ciidanka Qaranku, waxa uu yeelanaaya qaybta sirdoonka Ciidanka Qaranka (intelligence division) oo ka kooban:

1. Qaybta ka hortagga sirdoonnada kale (counter-intelligence);

2. Qaybta sirdoonka (intelligence department);

3. Iyo qaybaha kale ee Gudida Difaaca Qaranku u aragto daruuri, in uu yeesho Sirdoonka Ciidanka Qaranku.

## Qodobka 24aad

## **Xilka iyo shaqada** Sirdoonka **Ciidanka Qaranka**

Sirdoonka Ciidanka Qaranku waxa uu u xilsaaran yahay:

1. In uu Ciidanka Qaranka u ururiyo, isugu dubbarido, islamarkaana siiyo xog iy war;

2. In uu xaqiijiyo in Ciidanka Qaranku helo xogta iyo siraha daruuriga u ah hawlgudashadiisa iyo ilaalinta amniga qaranka.

3. In uu xaqiijiyo in Taliska Ciidanka Qaranka iyo Guddida Difaacu ay hesho xog sugan oo ay ku hawlgasho, kuna diyaariso siyaasadaha iyo istiraajiyadaha difaac ee dalku u baahan yahay.

4. Isku dubbaridista iyo la'socodka taageero debedeed ee Ciidanka Qaranku helo.

5. Ka gacansiinta Ciidanka Qaranka fullinta hawlgalada ciidan, si'waafaqsan istiraajiyadda difaaca.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

6. Ka gacansiita Ciidanka Qaranka diyaar garowga hawlgal.

7. Siinta taageero ciidamada dagaalka ku jira.

8. Hubinta iyo xaqjiinta in Ciidanka Qaranku yahay mid ammaan ah, xilliga nabadda iyo xilliga colaaddaba.

9. Ururrinta xog kasta oo u dan ah, in laga hortaggo oo loo diyaar garoowo dagaallada iyo farogellinta ciidamada shisheeye (foreign enemy).

### Qodobka 25aad

### Wada shaqaynta Sirdoonka Ciidanka Qaranka iyo Hay'adda Siroonka Qaranka

1. Abuurista Sirdoonka Ciidanka Qaranku, waxba uma dhimayso awoodaha iyo xilka Hay'adda Sirdoonka Qaranka ee ku astaysan Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka.

2. Sirdoonka Ciidanka Qaranku iyo Hay'adda Sirdoonka Qaranka waa inay wada shaqeeyaan oo ay yeeshaan xog wadaagista iyo iska war hayn.

### Qodobka 26aad

### Kala abla-ableynta hellida siraha ciidan

1. Sirdoonka Ciidanka Qaranku, waa in uu diyaariyo oo soo saaro hab-raaca derejda helidda xog sireed (grades of security clearances) oo kala caddaynaysa cid walba oo ka tirsan ciidanka, wasaaradda iyo Guddida Difaaca, derejeda amni ee ay leedahay (security clearances) iyo nooca xogta iyo qoraallada ee derejadaasi u ogolaanayso in ay aragto.

2. Waxa reebban, in lala wadaago qof xog iyo sir aan gaadhsiisnayn derejada amni (security clearances) ee qofkaasi leeyahay.

3. Haddii Sirdoonka Ciidanka Qaranku ay ku qancaan in qof la'siiyay derejo ogolaansho (security clearance) aanu u qalmin derejada ogolaansho ee uu haysto, waxa Sirdoonka Ciidanka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qaranku awood u leeyahay in uu kala noqdo derejada ama hoos u dhigo.

4. Waxa reebban in xubnaha Ciidanka Qaranka iyo shaqaalaha wasaaraddu ay isku dayaan in ay ogaadaan ama helaan xog aanay haysan derejada amni ee u ogolaanaysa in ay arki karaan ama heli karaan xogtaas.

5. Fal-dembiyeedka ka dhasha ku xadgudubka qodobkan waxa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta.

## QAYBTA SADDEXAAD

## WAAJIBAADKA IYO AWOODAHA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

### Qodobka 27aad

### Wasaaradda Gaashaandhigga

1. Si'waafaqsan qodobka 123aad ee Dastuurka JSL, Wasaaradda Gaashaandhigu waa korjoogteynta madaniga ah (civilian oversight) ee Ciidanka Qaranka.

2. Si'waafaqsan qodobka 123aad faqradiisa 4aad ee Dastuurka, qofka loo magacaabayo wasiirka Wasaaradda Gaashandhiggu, waa in uu ahaado muwaaddin madani ah (civilian).

3. Waxa reebban, in qof ciidan ahi uu noqdo wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.

4. Waaxyaha Wasaaradda Gaashaandhiggu, waa in ay u qaabaysan yihiin hannaan taageri

5. karta oo kobcin kara qaybaha kala duwan ee Ciidanka Qaranka.

### Qodobka 28aad

### Xilka Wasiirka Gaashaandhigga

Xilka Wasiirka Gaashaandhiggu waa:

1. In uu madaxweynaha kala taliyo arrimaha difaaca iyo Ciidanka Qaranka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. In uu Madaxweynaha talo ka siiyaa, magacaabista iyo shaqo ka fadhiisinta Taliyaha Ciidanka Qaranka iyo abbaanduuleyaasha iyo sidoo kale hawlgelinta, dallacsiinta iyo shaqo ka fadhiisinta saraakiisha sare.

3. In uu taageero oo kobciyo Ciidanka Qaranka.

4. In uu jiheeyo siyaasadda difaaca, iyada oo la samaynayo siyaasad difaac iyo siyaasadaha kale ee muhiimka ah iyo joogteynta dib u eegista siyaasadaha.

5. In uu hormuud uga noqdo Golaha Wasiirrada dhammaan arrimaha difaaca iyo isku dubbaridka Ciidanka Qaranka oo ay ka mid tahay hubinta, in loo helo miisaaniyad ku filan oo waxtar u leh Ciidanka Qaranka, islamarkaana xaqiijinta in hantida Ciidanka Qaranku ay tahay mid la jaan qaadi karta baahiyaha ciidanku qabo.

6. In uu xidhiidhiyo Ciidanka Qaranka iyo ciidamada dalalka kale ee iskaashiga la leh Jamhuuriyadda Somaliland.

7. In uu qaato doorka korjoogteynta madaniga ah (civilian oversight) ee Ciidanka Qaranka.

8. Xaqiijinta iyo hawlagallada Ciidanku ay waafaqsan yihiin Dastuurka, xeerarka dalka iyo istiraajiyadaha iyo siyaasadaha difaac ee dejisan.

9. Isku xidhka iyo isku duwista xidhiidhka Ciidanka Qaranka iyo hay'adaha kale ee amni iyo kuwa madani.

10. Ku abaabulidta shacabka Somaliland ee jooga da'da ciidanka lagu qori karo in ay ka qayb noqdaan Ciidanka Qaranka, si' loo xaqiijiyo in jiil kastaa qaato doorka difaaca dalka Jamhuuriyadda Somaliland.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA AFRAAD

## SHAQO QORISTA XUBNAHA CIIDANKA QARANKA

### Qodobka 29aad

### Ciidanka joogtada ah (regular force)

1. Taliska Ciidanka Qaranka ayaa qoraya xubnaha Ciidanka Qaranka ee loo baahan yahay.

2. Ka hor inta aan la'qorin xubno ciidan, waa in la'dejiyo shuruudaha lagu qorayo, hab-raaca iyo nidaamka dallacsiinta xubnaha Ciidanka Qaranka.

3. Wasiirka Wasaaradda Gaashandhigga ayaa xeer-nidaamiye ku soo saaraya habraaca ku xusan farqadda 2aad ee qodobkan, isaga oo ka duulaya Dastuurka iyo xeerkan, ka dib marka uu la'tashado Taliyaha Ciidanka.

4. Taliska Ciidanku, waa in ay shaaciyaan oo warbaahinta ku qoraan in ay u baahan yihiin ciidan ay qoranayaan iyo shuruudaha muddo aan ka yarayn soddon maalmood ka hor waqtiga shaqo qoristu bilaabmayso.

### Qodobka 30aad

### Shuruudaha xubnaha Ciidanka Qaranka

Qofka loo qaadanayo xubin ka mid ah Ciidanka Qaranka, si'waafaqsan Xeerkan:

1. Waa in uu yahay/tahay muwaaadin reer Somaliland ah.

2. Waa in uu yahay da'da 18 jir ama ka weyn yahay.

3. Wax dembi ah aanu hore u gelin/geysan

4. Waa in uu jidh ahaan, caafimaad ahaan iyo dhimir ahaanba u bedqabo.

5. Qofka loo qoraayo Ciidanka Qaranku, waa in ay mamnuuc ka ahaato shaqo kale. Waxaase laga reebi karaa kuwa haysta ogolaansho uu qoray Taliyaha Ciidanka, haddiiba ay khibradda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

iyo tababarka qofkaasi uu shaqadaa ka haystaa ay si toosa ama anfac yeelanaysa ay faa'iido ugu leedahay Ciidanka Qaranka, sidoo kale qofkaasi ma heli doono faa'iido oo aan ahayn in kharash daruuri ah oo ka baxay dib loo siiyo.

6. Taliyaha Ciidanku waxa uu masuul ka yahay isku dubbaridka qarameynta, middaas oo aan lahayn wax faquuq ah, kuna dhisan aqoon, karti iyo awood la'filayo.

7. Waa waajib dastuuri ah, in Ciidanka Qaranku ka koobnaado dhammaan deegaannada dalka oo dhan.

## Qodobka 31aad

## Qorista ciidanka ee qasabka ah

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, waxa uu awood u leeyahay xaaladda dalku galo dagaal in uu soo saaro amar madaxweyne oo si'qasab ah loogu qorayo ciidanka, nin kasta oo da'diisu u dhaxayso 18 illaa 25 jir.

2. Ninka diida in la'qoro ciidan xilli dagaal lagu jiro oo soo baxay amarka madaxweyne ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa uu gelayaa fal-dembiyeed, waxaana loo raacayaa Xeerka Ciqaabta.

3. Amarka madaxweyne ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waa in lagu baahiyo warbaahinta iyo faafinta rasmiga ah.

## Qodobka 32aad

## Tababarrada Ciidanka Qaranka.

1. Dhammaan dadka la'qorayaa, waa in ay helaan aqoon loogu talo galay, inta aan lagu hawlgalin waajibaabka ciidanka. Haddii qofku aanu ka gudbin tababarka shaqo bilawga/carbiska, waa in ay taasi sababto in qofka laga saaro shaqada.

2. Dhammaan xubnaha ciidanku, waa in ay helaan waxbarasho habboon iyo tababar ka anfacaya shaqooyinka iyo magacaabistiisa xigta.



FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

3. Tababarka xubnaha ciidanku si'gaar ah iyo si'guudba, waa in uu noqdaa shaqada dhammaan heerarka kala duwan ee taliyeyaasha, sidoo kale tababarka waaxaha iyo colalka.

4. Xubnaha ciidanka qaranku waxay tababar ku qaadanayaan Dusgiyada Tababarada ee Gudaha dalka iyo Dibaddiisaba.

5. Waxa waajib ah, in ay xubnaha Ciidanka Qaranku helaan fursado waxbarasho debadeed, si' ciidanku u noqdo ha'yad ku qalabaysan aqoon casri ah.

6. Askari kasta iyo sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Qaranku, waxa waajiba ah in uu leeyahy aqoon iyo tababar u dhiganta xilka uu hayo.

## Qodobka 33aad

## Magaacabista Xilalka Ciidanka Qaranka

1. Magacaabista xubnaha ciidanka iyo u qoondaynta jagooyinku waa in aanay lahayn wax faquuq ah, kuna dhisnaato aqoon, karti iyo shuruudaha soo socda.

2. Magacaabista xubnaha Ciidanka Qaranku waa in ay ku sallaysan tahay aqoonta, khibradda iyo kartida xubinta la'magacaabayo, iyada oo lagu xisaabtamayo kala sarraynta ciidanka (seniority).

3. Waa in xubnaha Ciidanka Qaranku, ay si siman oo caddaalad ku dhisan u helaan waxbarashada iyo tababarka looga baahan ciidanka, si ay ugu sinnaadaan fursadaha dallacsiinta iyo magacaabista.

## Qodobka 34aad

## Qiimeynta Ciidanka.

1. Xubnaha Ciidanku waa in ay helaan qiimeyn sannadle ah oo ku aaddan hawl gudashadooda iyo anshaxa, taas oo loo adeegsan karo hawlgelinta mustaqbalka, tababarrada iyo dallacsiinta.

2. Xubana ciidanku waa in ay helaan qiimeyn dheeraad ah, ka dib marka ay soo qaataan koorsooyin tababar oo muhiim ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 35aad

## Xuquuqda iyo Mushaharaadka Xubnaha Ciidanka Qaranka

1. Xubin kasta oo ciidanka ah oo gudanaya waajibaadkooda ciidannimo, waa in ay helaan mushahar ku filan oo ka kooban mushahar joogto ah, mushahar derajo iyo gunnooyin xileed/takhasus oo loo asteeyey/qoondeeyay.

2. Mushaharka ciidanka, waa la'hakin karaa ama la'duwi karaa qofka qaadanaya, si' waafaqsan nidaam cad oo sharci ah, tusaale ahaan deyn bixin ama magdhow la'siinayo dawladda, urur kale ama qof kale.

3. Xubin kasta oo ciidanka ah oo ku gudanaya waajibaadkooda waa in la'siiyaa saad, dawooyin, dhisme loo hoydo iyo gunno kiro ah.

4. Xubin kasta oo ah ciidanka oo gudanaya waajibaadkooda, waa in la'siiyaa 30 maalmood oo fasax ah sannadkii oo lagu daray maalmaha qaranka iyo diiniga ah ee fasaxyada dadweynaha. Fasax habboon ayaa isna la'siinayaa bukaanka iyo sababo kale oo laga garaabi karo.

5. Xubin kasta oo ciidanka ah oo gudanaya waajibaadkooda, waa in la'siiyaa dirays ciidan, qalab ciidan oo habboon, si'ay ugu gudan karaan waajibaadkooda.

6. Gunnooyinka waa in la'bixiyaa, si'loo daboolo kharashaadkii ku baxay hawlgalladii hore ee la'amaray.

7. Xubin kasta oo ciidan ah oo lagu helay dembi ciidan iyo xadhig, waa in ay waayaan mushaharkoodii joogtada ahaa, mushaharkii derajada, gunnooyinka gaarka ah, saadkii, daryeelkii dawooyinka, aqalkii uu deganaa oo ahaa guri ciidan, in ay ka guuraan inta ay ku jiraan xabsigaas.

8. Xubin kasta oo ciidanka ah ee la'yimaadda shaqo wanaag heersare ah, gaar ahaan marka lagu jiro hawlgallada dagaalka, waa in ay helaan abaalmarinno ay ka mid yihiin:

    b. Ammaan qoraal ah (loogu qoro Faylkooda shaqsi).



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

t. Abaalmarin dhaqaale.

j. Fasax dheeraad ah.

x. Talobixn ku aaddan Guddida Dallacsiinta

kh. Billad ama abaalmarin

### Qodobka 36aad

### Nidaamka Mushahar bixinta Ciidanka Qaranka.

1. Ciidanka Qaranka, waa in la siiyo mushahar ku filan oo la'jaan qaadaya nolosha dalka.

2. Xaddigga mushahar bixinta Ciidanka Qaranka, waxa ay ku soo baxaysaa digreeto madaxweyne.

### Qodobka 37aad

### Gunnada Xaqsiinta Hawlgabka iyo Magdhowga

Xubin kasta oo ciidanka ah oo ku gudo jira waajibaadkooda ciidannimo ee shaqada ka fadhiista, waa in ay helaan layli-tir iyo xuquuq hawlgab, iyada oo la'waafajinayo derajadooda, mushaharkooda iyo shaqadooda, waxaana looraacayaa hannaanka x aqsiinta iyo hawlgabka ee ku xusan Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka JSL Xeer L.r 88/2019.

### Qodobka 38aad

### Xogta Gaarka ah iyo Warbixinaha

1. Ciidanka Qaranku, waa in ay soo saaran oo ilaaliyaan xogaha gaarka ah iyo macluumaadka/warbixinaha lagama maarmaanka u ah maamulidda xubnaha ciidanka, si' waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale oo ay ku jiraan shaqo gelin, magacaabis, tababar, qiimeyn, dallacsiin, abaalmarinno, anshaxmarin, fasax, bedqab iyo daaweyn.

   Ciidanka Qaranku, waa in uu xaqiijiyaa in xogtani sax tahay, ka ilaashan tahay lumitaan ama ay isticmaali karaan ciddii loo igmaday/ogolaaday ujeeddo ku aaddan in ay ku maamulaan xubnaha ciidanka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ◆ FAAFINTA RASMIGA AH ◆ SOLICITOR GENERAL OFFICE ◆ OFFICIAL GAZETTE

2. Xubnaha ciidanku, waa in ay Ciidanka Qaranka ogaysiiyaan iyaga oo aan la'dib dhacayn warbixinaha muhiimka u ah maamulidda shaqada ciidanka.

## Qodobka 39aad

## Shaqaalaha Dawlada ee Ciidanka Qaranka.

1. Ciidanka Qaranku, waxa uu yeelan karaa shaqaale dawladeed oo ka kooban khuburo iyo shaqaale farsamo, waxaanu la'galaya heshiis shaqo.

2. Shaqaalaha Dawlada ee Ciidanka Qaranka u shaqeeya waxa lagu maamulayaa Xeerka Shaqaalaha Dawlada ee Somaliland Xeer L.R 97/2021.

3. Dadka shaqaalaha ah ee u shaqeeya Ciidanka Qaranka laguma dari karo colalka dagaalka, lamana geyn karo goobaha furimaha ah, goobaha khatarta ah/ halistoodu badan tahay, haddii aanay ahayn shaqada uu hayay mid uu ku wajihi lahaa.

## Qodobka 40aad

## Faylka Ciidanka

1. Ciidanka Qaranku, waxa uu yeelanayaa fayl ama diiwaan lagu keydiyo xogta iyo macluumaadka Ciidanka Qaranka oo dhan iyo xaaladahooda gaarka ah.

2. Askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Qaranku, waxa uu yeelanayaa fayl u gaar ah oo lagu keydiyo taariikh nololeedkiisa, dagaallada uu galay, aqoontiisa iyo noocyada tababar ee uu haysto, biladaha la'siiyay darajooyinkiisa, inta anshaxmarinood ee uu helay iyoxaaladdiisa caafimaad (medical condition).

3. Sannad kasta Taliska Ciidanka Qaranku ha'yadaha ay khusayso waxa uu la'soo wadaagayaa korodhka iyo tirokoobka xubnaha Ciidanka Qaranka.

4. Waxa reebban askari aan fayl lahayn iyo aqoonsiga gaarka ah ee lambarka tirsiga ciidanka iyo sawirkiisa iyo xilka ama derajada uu ka hayo ciidanka.

### Qdobka 41aad

### Faylka Ciidanka Keydka ah (reserve)

Taliska Ciidanka Qaranku waa in uu hayo faylka iyo diiwaanka dhammaan xubnaha ciidanka keydka ah oo ay ka mid tahay tababarka uu qaatay, da'da, heerka aqooneed, xogta cinwaanka laga heli karo iyo iyo derejada uu lahaa.

### Qodobka 42aad

### Shaqo ka saarista Xubnaha Ciidanka Qaranka.

Waxa lagu waayi karaa xubinnimada Ciidanka Qaranka:

1. Haddii xubin ku jirta tababarka koowaad (Cadet) ay ku dhacdo tababarka hore/
2. Hadii uu gaadho da'da khasabka ay tahay in lagu hawlgabo ama iyada oo uu dhamaado waqtigii shaqada. Da'da hawlgabka Ciidanka Qaranka iyadoo loo raacayo Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka Xeer Lr. 88/2019.
3. Haddii uu ku dhaco:
   i. Xanuun dhimirka ah oo uu caddeeyey dhakhtar takhasus u leh.
   ii. Xanuun jidhka ah oo aanu ka kici karin ama keeni kara in aanu gudan karin waajibaadkiisa shaqo oo u caddeeyo dhakhtar takhasus u leh.
4. Haddii uu dhinto.
5. Haddii guddi anshaxmarineed ay ku hesho fal keeni kara in la'eryo xubinta.
6. Haddii baahi timi darteed Guddida Difaacu go'aamiso in la'dhimo xubnaha Ciidanka Qaranka. Waxa waajib ah in



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

hannaanka dhimista loo raaco hab-raac qoran oo caddaalad iyo sinnaan ku dhisan.

7. Haddii xukun ciqaabeed kama dambays ahi ku dhaco.

### Qodobka 43aad

### Ciidanka Keydka ah (reserve)

1. Ciidanka Keydka ahi waa ciidanka la'siiyay tababar ciidan oo hore uga tirsanaa Ciidanka Qaranka ama ku tabarucay in uu noqday ciidanka keydka ah (reserve) ama qaatay tababarka shaqo-qaran.

2. Madaxweynuhu waxa uu awood u leeyahay in uu amar madaxweyne ugu yeedho xubnaha ciidanka keydka ah mar kasta oo loo baahdo.

3. Diidmada yeedhmada ciidanka keydka ahi waa fal-dembiyeed ciqaabtiisa loo raacayo Xeerka Ciqaabta.

## QAYBTA SHANAAD

## TABABARKA IYO ANSHAXMARINTA XUBNAHA CIIDANKA QARANKA

### Qodobka 44aad

### Tababarka Ciidanka Qaranka

1. Waasiirku, marka uu la'tashado Guddida Difaaca, waa in uu aasaaso Machadka Tababarka Ciidanka Qaranka oo u aasaasan in uu siiyo tababar kala duwan ciidamada.

2. Dhammaan dadka la'qorayo Ciidanka Qaranka, waa in ay helaan aqoon loogu talo galay inta aan lagu hawlgalin waajibaadka ciidanka.

3. Dhammaan xubnaha ciidanku, waa in ay helaan waxbarasho habboon iyo tababar ka anfacaysa shaqooyinka iyo magacaabistiisa xigta.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

4. Tababarka xubnaha ciidanku si' gaar ah iyo si' guudba, waa in uu noqdaa shaqada dhammaan heerarka kala duwan ee taliyeyaasha, sidoo kale tababarka waaxaha iyo colalka.

5. Xubnaha Ciidanka Qaranku waxa ay qaadanayaan tababarka gudaha iyo kuwa debadda.

6. Waxa waajib ah in ay xubnaha Ciidanka Qaranku helaan fursado waxbarasho oo debadeed, si'ciidanku u noqdo ha'yad ku qalabaysan aqoon casri ah.

7. Go'aanka u dirista xubin ciidan dalka debediisa si uu ugu soo qaato tabobar, aqoon korodhsiyo ama kooras gaaban, waxa iska leh Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, ka dib marka uu helo soojeedinta Taliyaha Ciidanka Qaranka.

8. Askari kasta iyo sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Qaranka waxa ku waajib ah in uu leeyahay/leedahay aqoon iyo tababar u dhiganta xilka uu hayo.

## Qodobka 45aad

## Kuliyada Tababarka Ciidanka Qaranka

1. Madaxweynaha ayaa digreeto ku soo saarayaa aassaaska Kulliyadaha tababarka ciidanka heer qaran ee arrimaha difaaca qaranka oo hoos imanaya Wasaaradda Gaashandhigga.

2. Waajibaadka shaqo ee Kuliyadaha tababarka waa cilmibaadhisaha la'xidhiidha xaaladaha amni ee dalka, xilliyada nabada iyo dagaalkaba, waxaanu samaynayaa warbixinno iyo talooyin kor loogu qaadayo amniga qaranka (National security).

3. Kuliyaduhu waa inay sameeyaan cilmibaadhisyo aqoon ku dhisan islamarkaana ay la'wadaagaan natiijooyinka cilmibaadhista hay'adaha amniga iyo tababarka ciidanka si'kor loogu qaado aqoonta Ciidanka Qaranka.

4. Madaxweyanaha ayaa magacaabaya xubnaha saree e Maamulka Kuliyadaha tababarka Ciidanka.

5. Wasiirka ayaa soo saaraya xeer-nidaamiyaha maamulka Machadka Amniga Qaranka, si'waafaqsan qodobkan.

## Qodobka 46aad

## Anshaxmarinta xubnaha Ciidanka Qaranka

1. Xubnaha ciidanka oo dhan, waa in ay u hoggaansamaan Xeerka Anshaxmarinta ee uu soo saaray Wasiirka Gaashandhiggu.

2. Dhaqan-gelinta Xeerka Anshaxmarintu, waa masuuliyad saaran taliyeyaasha ciidanka ee heer kasta.

3. Iyada oo aan waxba loo dhimayn Qodobka 22aad ee Dastuurku oo ogolaanaya ka qayb qaadashada siyaasadda ee muwaaddinka, haddana xubnaha ciidanka looma ogola in ay ku biiraan xisbi ama urur-siyaasadeed, kama qayb geli karaan, si'toos ahna uma taageeri karaan xisbi ama urur-siyaasadeed, xaflad ama shaqo siyaasadeed.

4. Anshaxmarinta gefefka, nidaamkooda iyo ganaaxooda waxa loo raaci doona Xeerka Anshaxmarinta Ciidanka Qaranka.

## Qodobka 47aad

## Masuuliyadda Gaarka ah

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Qaranka, waa in uu si' shakhsi ah masuul uga yahay dembi uu geystay, sidoo kalena loola dhaqmaa, si'waafaqsan xeerkan, xeer-nidaamiyeyaasha iyo Xeerka Ciqaabta Guud.

2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn qodobbada Xeerka Ciqaabta ee masuuliyadda dembi (criminal liability) iyo faqradda 1aad ee qodobkan, xubinta ciidanka looma raacayo masuuliyad shaqsi oo madani ah, haddii uu gaysto khasaare isaga oo gudanaya hawshiisa shaqo ama hawlgal ciidan.

3. Khasaaraha madani ee ka dhasha hawlgudashada ku cad faqradda 2aad ee qodobkan waxa loo raacayaa dawladda Somaliland



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

si'waafaqsan xeerarka dalka, waxaana uga masuul ah Wasaaradda Gaashaandhigga.

4. Xubinta ciidan ee gaysata khasaare iyada oo aan ku jirin hawlgal ciidan ama shaqo ciidan waxa ay leedahay masuuliyad madani ah oo shaqsi ah, si'waafaqsan xeerarka madani ee dhaqan-galka ah.

## QAYBAT LIXAAD

## NIDAAMKA DERAJO BIXINTA CIIDANKA QARANKA

### Qodobka 48aad

### Awoodda Derajo bixinta Ciidanka Qaranka.

Awoodda bixinta derajooyinka Ciidanka Qaranka, waxa iska leh madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka (Commander in chief). Derajooyinka ciidanku waxa ay ka koobnaan doonan:

1. Sarreeyeyaasha;
2. Saraakiisha iyo
3. Saraakiil xigeennada.
4. Askari.

### Qodobka 49aad

### Hannaanka Derajo Bixinta Ciidanka.

1. Madaxweynuhu waxa uu samayn doonaa si'waafaqsan xeerkan guddida derajo bixinta Ciidanka Qaranka oo ka kooban:

    i. Wasiirka Wasaaradda Gaashandhigga.

    ii. Taliyaha Ciidanka Qaranka.

    iii. La-taliyaha Amniga Qaranka.

    iv. Abbaanduulaha Ciidanka Qaranka.

    v. Iyo hoggaanka siyaasadda ee Ciidanka Qaranka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA * FAAFINTA RASMIGA AH * OFFICIAL GAZETTE * SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Guddidu sannad kasta bilowgiisa waa in ay siiyaan madaxweynaha warbixin la'xidhiidha xubnaha ciidanka ee mutaystay dallacaadaha iyo derajo siinta.

3. Warbixinta guddidu waa in ay tahay mid faahfaahsan oo ku salaysan xog sugan oo ka timid madaxda qaybaha kala duwan ee ciidanka.

4. Guddida, waxa ka reebban in ay ku salayso derejo bixinta qabyaalad, eex, qaraabo kiil, siyaasad iyo wax kasta oo kale oo eex iyo faquuq ah.

**Qodobka 50aad**

**Sababaha Dallacsiinta.**

Dallacaad derejo ciidan, waxa laggu mutaysan karaa: -

1. Muddo shaqo oo afar sannadood ah.

2. Kooras tacliimeed oo aan ka yarayn laba sannadood.

3. Hawl-karnimo xaalad dagaal ama waajib gudasho shaqo oo hagar la'aan ah.

**Qodobka 51aad**

**Waxyaabaha ka reebban derajo bixinta.**

1. Waxa ka reebban in derajo lagu bixiyo arrimaha ay ka mid yihiin:

   i. Qabyaalad.

   ii. eex iyo qaraabo kiil.

   iii. Laaluush ama musuqmaasuq.

   iv. Kala soo dhawaysasho/weji garasho.

   v. Afkaar siyaasadeed.

   vi. Aqoon la'aan iyo karti daro.



...AANKA GUUD EE QARANKA ... FAAFINTA RASMIGA AH ... GAZETTE ... OFFICE

2. Haddii ay caddaato in qof ku helay derejo mid ama ka badan sababaha ku cad faqradda 1aad ee qodobkan, waa in laga qaado derejada islamarkaana loo saaro guddi baadhiseed oo ka go'aan gaadha haddii ay ciqaabi ka dhalanayso.

3. Guddida baadhiseed waxa saaraya madaxweynaha Somaliland.

4. Guddida baadhitaan ee faqradda 2aad ee qodobkan ku tilmaaman waa in ay baadho xubinta la'siiyay derejada iyo guddida siisay labadaba.

## Qodobka 52aad

## Derajooyinka.

Derajooyinka Ciidanka Qaranku waa sidan:

1. SAREYAYAASHA oo ka koobna darajooyinka kala ah
   a) Sareeye Guud
   b) Sareeye Gaas
   c) Sareeye Guuto
2. SARAAKIISHA SARE oo ka koobna darajooyinka kala ah
   a) Gaashaanle Sare
   b) Gaashaanle Dhexe
   c) Gaashaanle
3. SARAAKIISHA HOOSE oo ka koobna darajooyinka kala ah
   a) Dhame
   b) Laba Xidigle
   c) Xidigle
4. SARAAKIIL XIGEEN oo ka koobna darajooyinka kala ah
   a) Kormeere Saddexaad /Saddexle



XAFIISKA GAR...AANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

b) Kormeere Labaad /Labaale

c) Kormeere Kowaad /midhle

d) Saddex Alifle

e) Laba Alifle

5. ASKARI oo ka koobna qaybahan.

a) Alifle

b) Dable

## Qodobka 53aad

## Bixinta billadaha

1. Madaxweynaha ayaa leh awoodda bixinta billadaha isaga oo siinaya cidda u qalanta xilliga nabadda iyo xilliga colaadaba.

2. Marka uu la'tashada madaxweynaha, waxa Wasiirka Gaashaandhiggu uu soo saaryaa xeer-nidaamiye lagu faahfaahinayo sida ay u'eekaanayso billad kasta, shuruudaha cidda u qalmaysa, bixinteeda, goobta iyo habka loo bixinayo, sida loo xidhanayo, kala noqoshada billad hore loo bixiyay, dib u siinta billad la'la noqday iyo wax kasta oo kale oo hab-raac ah oo daruuri u ah bixinta billadaha.

## Qodobka 54aad

## Billadaha

1. Billadaha Ciidanku waxa ay u qaybsamaan:

i. Billad-geesi hawl-karnimo dagaal.

ii. Billad-sharaf hawl-karnimo shaqo oo hagar la'aan ah.

iii. Billad-maamuus kasbasho aqooneed.

2. Noocyada Billadaha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

i. Billad Dahab ah.

ii. Billad Maar ah.

iii. Billad Qallin ah.

iv. Ammaan qoraal ah.

v. Qaddar lacageed ama fasax shaqo oo muddo kooban ah.

**Qodobka 55aad**

**Xidhashada billadaha**

Billadaha la'bixiyay waxa loo xidhanaya sidan:

1. Xubinta ciidanka ka tirsan waxa ay ku dhejisanaysaa dirayska (unifoorm-ka);

2. Xubinta hore uga tirsanayd ciidanka ee la'siiyay billad, waxa ay ku dhejisan kartaa dharka caadiga ah ee shacabka.

3. Dadka rayidka ah ee xigtada ugu dhow ah xubin ciidan oo dhimmatay oo la'siiyay billad waxa ay ku dhejisan kartaa dharka caadiga ah ee shacabka.

**Qodobka 56aad**

**Dirayska Ciidanka Qaranka**

Xubnaha ciidanka ee ku gudo jira waajibaadkooda shaqo waa in ay xidhaan dirayska, oo ay ku jiraan aqoonsiyada muujinaya Astaanta Ciidanka Qaranka, aqoonsiyo ay ka muuqdaan derajooyinku, haddii aanay jirin amar hore loo siiyay oo sheegaya in aanay dirays xidhan, amarkaas oo uu bixiyay taliyaha xukuma.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA TODDOBAAD

## MAALIYADDA IYO HANTIDA CIIDANKA QARANKA

### Qodobka 57aad

### Nidaamka Maamulka Maaliyadda Ciidanka Qaranka.

1. Ciidanka Qaranku waxa uu yeelanayaa hoggaanka xisaabaadka iyo maamulka, oo maamuli doona nidaamka maaliyadeed iyo mushahar bixinta Ciidanka Qaranka.

2. Ciidanka Qaranku waxa uu dakhligiisa dhiganayaa Baanka Dhexe ee dawladda.

3. Dhammaan xubnaha Ciidanka Qaranku waxa ay xisaab maaliyadeed ku yeelanayaan bangiga dawladda oo loogu shubi doono mushaharadkooda iyo xuquuqahooda kale.

### Qodobka 58aad

### Hanti-dhawrka Ciidanka Qaranka.

1. Ciidanka Qaranku waxa uu yeelanayaa hanti-dhawrka gudaha oo samayn doona dhammaan baadhitaannada iyo dabagalka maaliyadeed ee gudaha, marka uu sidaa ku amro Taliyaha Ciidanka Qaranku, sidoo kale waxa uu warbixin ka diyaarin doonaa nidaamka shaqo wanaagga iyo saacadaha shaqada ee xubnaha Ciidanka Qaranka (performance auditing).

2. Hanti-dhawraha Guud ee Qaranku waxa uu awood u leeyahay in uu baadhis ku sameeyo nidaamka maaliyadeed ee Ciidanka Qaranka, si'waafaqsan Xeerka Hanti-dhawrka Xeer L.r 76/2016.

3. Sannad miisaaniyadeed kasta Ciidanka Qaranka waxa ku waajib ah in ay keenaan xisaab-xidhkooda maaliyadeed oo lagu soo dari doono xisaab-xidhka guud ee uu Hanti-dhawrku u soo gudbiyo Golaha Wakiillada, waxaana loo raacayaa si'waafaqsan xeerka Maamulka MaaliyaddaXeer L.r 75/2016.



FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 59aad

## Hantida Ciidanka Qaranka

1. Ciidanka Qaranku waxa uu yeelan karaa hanti guurto ah iyo mid ma'guurto ah, waxaanu ugu tasarufi karaa si sharciga waafaqsan.

2. Ciidanka Qaranku waa in uu ilaashadaa dhammaan hantida uu leeyahay sida dhismeyaasha, hubka, qalabka iyo hantida.

3. Hantida Ciidanku waa in ay diiwaangashan tahay, la'hubiyaana si'joogto ah oo la'ogaado helitaankeeda iyo isticmaalkeeda. Lumitaan ama dhaawac ay keenaan dayacaad ama aqoon la'aan waa in la'baadho, warbixinna laga diyaariyo.

4. Waa in lagu dedaalo sidii loogu magdhabilahaa khasaaraha/kharashka soo gaadhay Ciidanka Qaranka. Waxaana masuul ka ah hoggaanka farsamada iyo tiknoolajiyadda.

## Qodobka 60aad

## Qandaraasyada Ciidanka Qaranka

1. Ciidanka Qaranku nidaamkiisa qandraaas bixinta waxa uu u marayaa Gudida Qandaraasyada Qaranka, si'waafaqsan Xeerka Qandaraasyada Qaranka, gaar ahaan qandaraasyda la'xidhiidha dirayska, kabaha, raashinka, shidaalka qalabyada kale ee lagama maarmaanka u ah shaqadooda.

2. Sirdoonka Ciidanka Qaranku, waxa uu u gudbin karaa Guddida Difaaca, shirkadaha sababo ammaan dartood aan uga qayb geli karin qandraasyada la'xidhiidha Ciidanka Qaranka.

3. Guddida Difaacu, marka ay helaan soo jeedinta ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan islamarkaana uu ku qanco sababaha Sirdoonka Ciidanka Qaranka, waxa uu ku amrayaa Wasiirka Gaashaandhigga in uu soo saaro liiska shirkadaha aan ka qayb geli karin tartanka qandaraasyada la'xidhiidha Ciidanka Qaranka.

4. Waxa ka reebban Guddida Qandaraasyada Qaranka, bixinta qandaraasyada la'xidhiidha arrimo amni ama sir ciidanka ah oo aan la'xayaysiin karin.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

5. Wasiirka Gaashaandhigga ayaa xeer-nidaamiye ku faahfaahinaya, ka dib marka uu la' tashado Guddida Difaaca, qandaraasyada gaarka ah ee sababo ammaan darteed aan loo marin karin Guddida Qandaraasyada.

6. Qandaraasyada ku xusan faqradda 4aad ee qodobkan, waa in xeer-nidaamiyaha ku xusan faqradda 3aad lagu aasaaso guddi gaar ah oo maamusha qandaraasyada gaarka ah.

### Qodobka 61aad

### Waxsoosaarka Ciidanka Qaranka

1. Ciidanka Qaranku waxa uu yeelanayaa waax u xilsaaran waxsoosaarka sida: beeraha, kalluunka iyo kheyraadka kale ee dabeeciga ah, isaga oo adeegsanaya cududdiisa iyo cilmigiisa, kana jawaabaya daboolista baahiyihiisa aasaasiga ah.

2. Waxa reebban in ciidanku iibiyo waxsoosaarka uu soo saaro.

## QAYBTA SIDDEEDAAD

## QODOBBO KALA DUWAN

### Qodobka 62aad

### Guddida Baadhista (Inquiry)

1. Madaxweynuhu waxa uu awood u leeyahay in uu magacaabo guddi baadhiseed oo qabata hawl baadhiseed oo cayiman.

2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn faqradda koowaad ee qodobkan, madaxaweynuhu waxa uu guddiyo baadhiseed u diri karaa arrimaha maamulka iyo shaqada ciidanka ama arrin si' gaar ah u saamaysay sarkaal ciidan ama hawlgal ciidan oo u baahday baadhitaan iyo ka soo warbixin.

3. Guddida baadhiseed waxa waajib ku ah in ay raacdo hannaanka iyo tilmaamaha uu siiyay madaxweynuhu oo ay ku soo gudbiso natiijada baadhistooda muddada uu cayimo madaxweynuhu.

## Qodobka 63aad

## Waajibaadka Muwaaddinka ee Difaaca Qaranka

1. Si'waafaqsan qodobka 34aad faqraddiisa 1aad ee Dastuurka qof kasta oo muwaaddin ah waxa ku waajib ah adkeynta midnimada ummadda, ilaalinta jiritaanka qarannimada, difaaca dalka iyo diinta, si'waafaqsan xeerka, waxaana muwaddiniinta ku waajib ah difaaca dalka xilliga loo baahdo.

## Qodobka 64aad

## U warbixinta Baaralamaanka

1. Sannad kasta bilowgiisa Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka waxa ku waajib ah in ay horyimaddaan Guddida Amniga iyo Arrimaha Gudaha ee Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida si' ay warbixin uga siiyaan xaaladaha difaac iyo amni ee dalka.

2. Hor tegidda ku xusan faqradda koowaad ee qodobkan waxa ay ka dhacaysaa Gole walba gaarkiisa.

## Qodobka 65aad

## Xeer-nidaamiyeyaal

1. Wasiirka Gaashaandhiggu waxa uu kusoo saarayaa xeer-nidaamiyeyaasha lagu dhaqan-gelinaayo xeerkan ee ku xusan qodobbada xeerkan iyo hageyaasha maamul muddo 90 cisho gudahood ah ka dib marka uu madaxweynahu saxeexo.

2. Taliyaha Ciidanka iyo Taliska Guud ee Ciidanka Qaranka waxa ku waajib ah hirgelinta xeerkan iyo hab-raacyada iyo xeer-nidaamiyeyaasha ka dheegma/farcama.

## Qodobka 66aad

## Laalis

Xeerkani waxa uu tirtiray xeer kasta, qodob kasta iyo wareegto maamul oo khilaafsan ama aan la'socon karin waafaqsanaanta xeerkan gaarka ah ama ka horreeyay oo lagu maamuli jiray Ciidanka Qaranka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 67aad

## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan, madaxweynuhuna saxeexo ee uu ku soo baxo faafinta rasmiga ah.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL** | **Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL** |
| ______________________________ | ______________________________ |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE